



# Sheekada la wadaag



## Tabta baro

- Qof la-raadinayo:** Ka bilowa inaad ka hada hadashaan jiliyaasha ugu muhiimsan ee sheekada. Waayo qofka (ama xayawaanka!) ugu muhiimsan ee ku jira sheekada? Waxaa dhici karta inay jiraan wax ka badan hal. Maxay rabeen?
- Laakin:** Ka dib kala hadal cidda ama waxa ka joojinayay jilaaga ugu muhiimsanaa inay helaan waxay rabeen. Kan waxaa loogu yeeraa dhibaatada ama *khilaafka*.
- Markaa-kadib:-** Ugu dambeyntii, kala hadal sida dhibka loo xaliyay. Maxaa ku dhacay jilaaga ugu weynaa ee sheekada? Ma isbedeshay xaaladda? Ma wax ay sameeyeen si ay dhibaatada uga gudbaan?

## Waa maxay sababta tabtan?

Ilmahaaga ka caawi inuu isticmaalo gacantooda si ay u soo koobaan. Waa wax iska caadi ah haddii ilmahaaga u baahdo inuu dib ugu rogo sawirada ama boggaga si uu u xasuusto tafaasiisha. Ka hadalka buuggu wuxuu ilmahaaga ka caawinayaa inuu fahmo sheekada iyo sida qaybuuhu isu wada socdaan. Waxaa intaa sii dheer, waa wax xiiso leh in la isla wadaago sheeko aad ka wada hesheen!



## Ubadkaaga weydii

*Dhammaan da' kasta:*

- [Qof] Waayo jilaagii ugu muhiimsanaa?
- [La raadinayay] Muxuu jilaagu rabay?
- [Laakiin] Maxaa dhacay? Muxuu ahaa dhibka jilaagu? Waa maxay sababta ay u heli waayeen waxa ay rabeen?
- [Haddaba] Maxaa dhacay ka dib? Sidee loo xaliyay dhibka jilaagu?
- [Markaa] Sidee bay ku dhamaatay sheekadu?

*Ilmaha ka caawi inay tixraacaan buugga adiga oo weydiya su'aalaha sida:*

- Sidee ku taqaanaa isaga?
- I tus erayada iyo oraahyada kaa caawinaya inaad taas ogaato.
- Boggee ayaad taas ku baratay?



## Ku celcelis ciyaar leh

Intii aad sheekada dib kor ugu sheegi la'hayd, sawirro ku samee. Warqad ku qor mid kasta oo ka mid ah sheegista (Qof, La Raadinayo, Laakin, Markaa, Kadib). Kadibna, ilmahaaga ku casuun inuu sawir ku hoos sawiro ereyga.

Tusaale ahaan, "Qof," ilmahaagu wuxuu sawiri doonaa jilaha ugu muhiimsan. Wixii "La raadinayay," ilmahaagu wuxuu sawiri doonaa waxa jilaagu raadinayay ama dhibka ay la kulmeen.